

Sharciga 15 Febraayo 1961, lamba. 9

Dhisidda Guddiga Shaqaalaha Dawladda.

MADAXWAYNAHA KU-MEELGAARKA JAMHUURIYADDA

Marka uu arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer-dejinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

**Qod. 1
Dhismaha**

Golaha Guddoonka Wasiirada wuxuu dhisay Guddiga Shaqaalaha Dawladda.

**Qod. 2
Ka Koobanaanta**

Guddiga Shaqaalaha Dawladda wuxuu ka koobanyahay Guddoomiye iyo lix xubnood oo lagu soo magaacaabo Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda marka uu soo jeediyo Wasiirka Koobaad oo dhagaystay talada Golaha Wasiirada.

Guddoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Shaqaalaha waxay xilka haynayaan saddex sano waana oo loo cusboonaysiin karaa.

**Qod. 3
Kafaale-Qaad**

Saraakiisha iyo shaqaalaha dawladda oo ay magacaabaan Guddoomiyaha ama Xubnaha Guddiga, inta aya shaqada hayaan, waxaa loo baddali karaa xarumo shaqao oo ka duwan meelaha ay joogaan ee lagu meelayay marka la magacaabay keliya haddii ay iyagu codsadan ama raalli ka yihiin ama, haddii aanay jirin marka la helo waafaqsanaanta talada isla Guddiga Shaqaalaha Dawladda.

**Qod. 4
Xilalka**

Guddiga Shaqada xilkoodu waa sida hay'ad Dawladda kala talisa xeerka shaqalaha dawladda iyo maadaada abaabulka, habsami u socodka iyo wanaajinta farsamo ee adeegyada. Guddiga Shaqalaha Dawladda waxaa laga dhagaysanayaa dhammaan arrimaha sida wayn ugu lug leh xaaladda sharci iyo dhaqaalaha la siiyo shaqaalaha madaniga ee Dawladda sidoo kale abaabulka iyo habsami u socodka guud ahaan ee Maamulka Dawladda.

Waxaa kaloo laga dhagaysan karaa arrin kasta oo si guud maamulka Dawladdu uu daneynayo.

Dawladdu waxay u xilsaari kartaa Guddiga Shaqaalaha Dawladda maaddada la sheegay darasadda arrima gaara iyo qaabaynta tala soo jeedimo.

**Qod. 5
Xoghaynta**

Xoghayaha Guddiga Shaqaalaha Dawladda waxaa Xeer ku soo magacaabaya Wasiirka Koobaad marka uu soo bandhigo Wasiirka Arrimaha Guud.

Qod. 6
Isku Yeeritaanka

Guddiga Shaqaalaha Dawladda waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha marka uu garto ama la helo codsi ka yimid Guddoonka Golaha Wasiirada ama Wasiirka Arrimaha Guud.

Qod. 7
Xeerka Nidaaminta iyo Isku-Duwidda

Dawladdu waxay u fasaxantahay in Xeer ku soo saarto xeerarka nidaamin iyo isku-duwid ee kolba loo bahdo si loo fuliyo Xeerkan.

Qod. 8
Dhaqan-Galka

Xeerkaanu wuxuu dhaqangalyaa marka lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaliya. Xeerkan waxa lagu soo darayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxana lagu bahinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo la soo gudboonadda waxaa ku waajiba in u u hoggaansamo iyo in ka axeer ahaan loo hoggaansamo.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Taariikhda, Muqdisho, 11 Febraayo 1961.

Wasiirka Koobaad

CABDI-RASHIID CALI SHERMAARKE

Wasiirka arrimaha Guud

CUSMAAN MAXAMUUD IBRAAHIM